

Xukunka Guddiga Culumada ee ku aaddan**Khilaafaadka Milkilayaasha Shirkadda SOMGULF**

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على رسول الله المبعوث رحمة للعالمين، صلى الله عليه وعلى آله وصحبه
وسلم أجمعين.

Macne Erayo:

1. **SOMGULF** waa shirkad soomaaliyeed oo ka ganacsata dhulka iyo dhismaha guryaha, la aasaasay sannadkii 2005, fadhigeeduna yahay dalka Isutagga Imaaraadka Carabta, waxayna ka dhexaysaa dadka magacyadoodu kala yihiin:

- Xasan Jaamac Maxamed
- Cali Xasan Yuusuf
- CabdiWeli Faarax Cali (Cagey)
- Shukriya Cabdi Warfaa
- Emmelle Axmed Xaaji (Sahra)

2. **Guddiga Culumada:** waa Culumada kala ah:

- | | |
|---|------------|
| • Sheekh Maxamuud Maxamed Maxamuud (Shibli) | Guddoomiye |
| • Sheekh Cabdirisaaq Aadan Macallin | Xubin |
| • Shariif Cabdifataax Shariif Mahdi | Xubin |

Waxaa xoghayn u ah **Cabdirisaaq Jaamac Xuseen**

Mashaariicda Shirkadda SOMGULF

1. **SOMGULF Twin Towers¹** waa dhisme laba dhisme oo isku dheggan oo ay shirkaddu ka hirgalisay Cajman, xaafadda Nuceymiyah UAE. Mashruucani waxa uu dhammaaday June 2007.

Xaaladda Mashruuca:

A. Waa mashruuca kaliya ee lagu guulaystay dhamaystirkiisa, waxaana guryihiisa sharci ahaan² laga iibiyay dad badan oo kala jooga daafaha aduunka in kasta oo uu qaanuun ahaan³ ku qoran yahay magaca shanta qof ee SOMGULF.

B. Waxaa jira dhibaatooyin badan oo khatar ku haya jiritaanka mashruucan, waxaana ka mid ah:

- Dubai Islamic Bank oo rahan ahaan ugu haysta GMC Towers deyn u gaar ah SOMGULF oo aysan lug ku lahayn dadkii laga iibiyey guryaha, SOMGULFna ay ku fashilantay bixinteeda.
- Korontada uu gurigu ku shaqeeyo oo ah matooro (Generators) u baahan qarash badan oo bil kasta ah, taas oo hoos u dhigaysa dakhliga iyo qiimaha guriga hadii la doono in la iibiyo.

¹ Waxaa kale oo loo yaqaan SOMGULF GMC Towers

² Shareecada Islaamka

³ Xeerka iyo nidaamka dalka

Cfu
12/12/2014

[Signature]
12/12/2014

[Signature]
12-12-2014